

Victims &
Witnesses

# HADDA MARKHAATI BAAD TAHAY

## Macluumaadka markhaatiyaasha caddaynaya dacwad dembiyeed

Office of Public Prosecutions
Victoria



## Maxaa ku lug leh markaad caddayn ka bixinayso dacwad dembiyeed? Sidee isu diyaarin kartaa?

Markaad bixineysid caddayn, waxaad kaalin qiimo leh ka qaadaneysaa nidaamka caddaaladda dembiyada. Nidaamka maxkamaddu wuxuu ku tiirsan yahay caawinta uu ka helayo markhaatiyada runta sheega.

## Adeegga xeer ilaalinta

Dambiyada halista ah ee Victoria waxaa dacweeya Agaasimaha Xeer Ilaalinta Dadweynaha iyada oo loo marayo Xafiiska Xeer Ilaalinta Dadweynaha (OPP).

Kooxda dacwad oogayaasha OPP waxay la shaqeeyaan Victoria Police si ay dacwad ugu oogaan arrimaha dembiyada. Si kastaba ha ahaatee, ma baarno dembiyada waxaana nahay hay'ad madaxbannaan. Tan micnaheedu waxaa weeye waxaan ka madax bannaannahay booliska, warbaahinta, iyo maxkamadaha.

Kooxda dacwad-oogaha ee OPP waxay ka kooban yihiin garyaqaan diyaariya kiiska, iyo xeer-ilaaliye su'aalo weydiiya markhaatiyaasha maxkamadda oo u soo bandhiga kiiska garsooraha iyo xeerbeegtida, iyo shaqaale bulsho.

## Taageerada markhaatiga

Waa wax caadi ah inaad dareentid walwal ku saabsan inaad maxkamada siisid caddayn. Adeegga Caawinta Dhibanaha iyo Adeegga Markhaatiga (VWAS) ee OPP ayaa ku siin kara macluumaad iyo taageero inta hawsha lagu jiro. VWAS waa adeeg bilaash ah oo takhasus leh oo ay ka shaqeeyaan xirfadlayaal aqoon leh isla markaasna khibrad u leh taageerida markhaatiyada iyo dhibanayaasha dembiyada culus.

### Shaqaalaha VWAS waxay awoodaan:

- inay sharaxaan waxa dhacaya maxkamadda ka hor, inta lagu jiro iyo kadib maxkamadda
- inay kaa caawiyaan helitaanka xuquuqdaada
- inay kuu gudbiyaan hey'ado iyo adeegyo kale.

### Talooyin

- Haddii aad qabtid wax su'aalo ah oo ku saabsan arrin, ama aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah, la xiriir garyaqaanka OPP, xog-hayaha booliiska ama VWAS.
- Diyaarso qof kuu haya carruurtaada maaddaama aysan maxkamadda lahayn xarumo xannaaneeya carruurta.



## La macaamiiltanka u yeeritaanka maxkamadda

Haddii aad caddayn ka bixinayso dacwad dembiyeed waxay ka dhigan tahay inaad bayaan siisay booliska oo aad heshay amar maxkamadu kuugu wacday.

Wicitaan maxkamadeed waxaa loola jeedaa waa inaad maxkamadda aaddaa oo aad ka jawaabtaa su'aalaha (caddayn sii) ku saabsan wixii aad booliska u sheegtay. Waxaa jira ganaaxyo culus haddii aadan tagin maxkamadda marka laguu soo diro kasoo qeybgal maxkamadeed.

Macluumaadka lagala xiriiri karo bilayska xogta lala wadaagay, ee baaray dembiga, iyo garyaqaanka OPP ee aad la macaamili doonto, waxay ku jiri doonaan u-yeeridda.

## Taariikhda maxkamadda

U yeeridda maxkamaddu waxay kuu sheegi doontaa taariikhda ugu horreysa ee maxkamadaynta, laakiin waxaa laga yaabaa inaysan taas noqon taariikhda loo baahan yahay inaad caddayn bixiso.

War-bixiyaha booliiska ayaa kula soo xiriiri doona si laguugu sheego marka loo baahan yahay inaad maxkamadda tagtid.

Haddii aan lagula soo xiriirin, fadlan wac war-bixiyaha booliiska ama garyaqaanka OPP.

## Diyaargarowga loo baahan yahay

Ka hor inta aadan tagin maxkamadda waxaad u baahan doontaa inaad diyaarsatid fasax ka qaadasho shaqada ama waxbarashada ah. Waxaa laga yaabaa in loo baahdo inaad maxkamadda tagtid hal maalin kabadan.

### Waxaad u baahan tahay inaad u sheegto war -bixiyaha booliiska ama looyarka OPP haddii:

- aad u baahan tahay turjumaan
- aad leedahay naafonimo taasoo kugu adkayn karta inaad bixiso caddayn
- beddeshid cinwaankaaga (addresskaaga) ama lambarka taleefankaaga.

## Kharashyada markhaatiga

Waxaad dalban kartaa in laguu soo celiyo qeyb ka mid ah kharashka kaaga baxay ka-qaybgalka maxkamadda. Foomka Sheegashada Kharashka Marqaatiga oo ay la socoto wicitaanka maxkamada (subpoena) ayaa laguu soo diri doonaa ayadoo laguugu sharaxayo inta aad dalban karto in laguu soo celiyo. Baarkinada baabuurta la dhigto iyo daryeelka ilmaha lama dalban karo.

# Imaanshaha maxkamadda



## U-diyaargaroowga caddayn bixinta

Maalinta aad tageysid maxkamadda, si taxaddar leh u akhri qoraalkaaga dhawr jeer. Tani waxay dib u cusboonaysiin doontaa xusuustaada wixii aad u sheegtay booliiska. Ma eegi doontid bayaankaaga intaad bixinayso caddayn.

Ha kala hadlin wixii aad booliska u sheegtay markhaatiyaal kale, intaadan tagin maxkamadda kahor ama dibadda qolka maxkamadda.

Haddii aadan doonayn in cinwaankaaga laga sheego maxkamadda, waa inaad u sheegtaa garyaqaanka OPP ama xog-hayaha bilayska ka hor inta maxkamaddu bilaaban.

## Imaanshaha maxkamadda

Markaad timaaddo maxkamadda (haddii aan hore loola qorsheyn war-bixiyaha booliiska):

- sii dhex mar waardiyaha (sakuuratiga) maxkamadda, haddii loo baahdo
- hubi liistada maxkamadda maalinlaha ah ee ku yaal boodhka ogeysiiska
- hel magaca qofka dacwaddu ku socoto iyo lambarka qolka maxkamadda
- aad qolka maxkamadda oo sug in war-bixiyaha booliiska ama garyaqaanka OPP uu kula soo xiriiro
- haddii aad ku sugan tahay maxkamad ku taal degmo ama tuulo, waxaad tegi kartaa miiska Diiwaanhayaha si uu kuu caawiyo.

### Talooyin

- Haddii aad gaari u kaxaynayso maxkamadda, hubi inaad heli kartid baarkin maalinta oo dhan ah si aan laguu ganaaxin
- Laguuma oggola inaad fadhiisato qolka maxkamadda oo aad dhegaysato markhaatiyada kale ka hor intaadan bixin caddayntaada. Qaado wax aad akhrisatid ama waqtiga isku dhaafisid intaad sugayso.
- Maxkamaduhu sida caadiga ah waxaa la fadhiyaa 10:00am ilaa 4:15pm galabnimo iyadoo xilliga qadada loo baxo ay tahay 1:00pm ilaa 2:00pm.



## Gudaha qolka maxkamadda

Dacwadda dambiyada waxaa lagu qabtaa garsoore iyo xeerbeegti hortooda. Dhammaan markhaatiyaasha ku lug leh dacwad-qaadid, oo ay ku jiraan dhibbaneyaasha dembigu, waxay bixiyaan caddayn iyagoo ka jawaabaya su'aalaha.

### Aadista qolka maxkamadda

Marka la gaaro waqtigii aad caddayn bixin lahayd, magacaaga ayaa lagu dhawaaqi doonaa. Kadib markaad gasho maxkamadda, waxaa lagu tusi doonaa sanduuqa markhaatiga.

### Sarkaalka maxkamadda ayaa ku weydiin doona:

- haddii aad rabtid inaad ku dhaarato Bible-ka ama Kitaab kale, ama in aad ballan qaaddo inaad runta sheegi doonto (xaqiijin)
- magacaaga oo dhameystiran
- in lagu dhaariyo ama aad ballan qaadid.

Xeer-ilaaliyaha ayaa markaas kabacdi ku weydiin doona:

- magacaaga oo dhameystiran
- shaqadaada.

### Habka caddaynta

Xeer ilaaliyaha ayaa ku weydiin doona su'aalo marka hore. Tan waxaa lagu magacaabaa 'caddeyn-guud'.

Garyaqaanka difaaca, oo wakiil ka ah qofka eedaysanaha ah, ayaa su'aalo ku weydiin doona. Tan waxaa lagu magacaabaa 'isweydaarsiga su'aalaha'.

Xeer ilaaliyuhu wuxuu ku weydiin karaa su'aalo dheeraad ah. Tan waxaa lagu magacaabaa 'dib-u-baaris'.

Garsooraha ayaa sidoo kale laga yaabaa inuu ku weydiiyo su'aalo.

### Talooyin

- Garsoorayaasha waxaa loogu yeeraa ‘Your Honour’.
- La xiriir VWAS haddii aad jeclaan lahayd inuu ku wehliyo qof ku taageera markaadmaxkamadda ku sugan tahay iyo inta aad bixinayso caddayntaada.

# Caddayn bixinta

Sheegista runta ayaa ah waxa ugu muhiimsan ee la sameeyo marka laga jawaabayo su'aalaha maxkamadda.

## Markaad bixinayso caddayn:

- si fiican u dhegeyso su'aasha ka hor intaadan ka jawaabin
- waqtigaaga qaado markaad jawaabayso
- haddii aadan maqlin ama aadan fahmin su'aal, weydii in lagusoo celiyo
- haddii aadan xasuusan karin ama aadan hubin, waa inaad sidaas sheegta
- haddii aad hubto, waad sheegi kartaa
- markaad dhammaysid markhaati kaca, garsooruhu wuu ku fasixi doonaa oo xor baad u tahay inaad tagto.

### Talooyin

- Waxaad weydiisan kartaa garsoorka nasasho haddii aad u baahan tahay.
- Mikrafoonku wuxuu duubayaa jawaabahaaga laakiin codkaaga ma dheereynayo, markaa waxaad u baahan tahay inaad si cad u hadasho.

# Ku-xadgudubka galmada iyo arrimaha rabshadaha qoyska

Haddii aad tahay dhibane xadgudub galmo waxaad caddayntaada bixin kartaa adigoon ku sugneyn maxkamadda oo adeegsanaya telefishanka xidhan. Haddii aad tahay dhibane rabshad qoys waxaa sidoo kale laguu oggolaan karaa inaad isticmaasho telefishanka xidhan si aad u bixiso caddayntaada.

Arrimaha dembiga galmada iyo arrimaha rabshada qoyska, maxkamaddu waxay amri kartaa in markhaatigu bixiyo caddayn ayadoo qofku joogo meel kale.

Waxa kale oo laguu oggol yahay qof ku caawiya oo kula fadhiya meesha ka baxsan maxkamadda inta aad caddayn bixinayso. Qofka ku caawinaya waa in maxkamaddu oggolaato oo marqaati kale ma noqon karo.

VWAS waxay kaaga jawaabi kartaa su'aalahaaga ku saabsan adeegsiga goob markhaati ee ka baxsan maxkamadda si aad u bixiso caddayntaada.

# Dhamaadka dacwada

Markay dhammaan markhaatiyaashu bixiyaan caddayn, xeer ilaaliyaha, garyaqaanka difaaca iyo garsooraha ayaa kala hadli doona xeerbeegtida wax ku saabsan caddaynta iyo sharciga.

Xeerbeegtida ayaa markaa go'aamin doonta in eedaysanuhu yahay dambiile iyo in kale. Ma jiro waqti xaddidan inta xeerbeegtu qaadan karto si ay go'aan u gaarto.

Haddii eedaysanaha lagu helo dembi, dhibbanuhu wuxuu diyaarin karaa Qoraalka Saameynta Dhibanaha, kaas oo loo soo bandhigi doono maxkamadda marka ay tahay dhegeysiga qirashada.

Garsooruhu wuxuu go'aamin doonaa xukunka dhegeysi gaar ah. Tani badanaa waxay dhacdaa dhegeysiga maalin kale.

Haddii eedaysanaha lagu waayo dembi, waxay xor u yihiin inay tagaan.

Xog-hayaha booliiska, garyaqaanka OPP ama WAS ayaa kuu sheegi doona natiijada maxkamadeynta.

## Qodobbada Muhiimka ah

- Haddii laguugu yeero wicitaan maxkamadeed waa inaad tagtaa maxkamadda si aad u bixiso caddayn.
- Waxaa muhiim ah in runta la sheego marka caddayn la bixinayo.
- Marnaba markhaatiyada kale ha kala hadlin caddayntaada.
- Haddii aad tahay dhibane xadgudub galmo waxaad caddayntaada ka bixin kartaa meel ka fog maxkamadda adiga oo adeegsanaya telefishanka xidhan. Haddii aad tahay dhibane rabshad qoys waxaa sidoo kale laguu oggolaan karaa inaad isticmaasho telefishanka xidhan si aad u bixiso caddayntaada.
- Taageero ayaa laga heli karaa Adeegga Caawinta Dhibanaha iyo Markhaatiga.
- Waxaad weydiin kartaa xog-hayaha booliiska ama garyaqaanka OPP macluumaad ku saabsan arrinta aad ku lug leedahay.
- Kooxda dacwad-oogaha u sheeg haddii aad beddesho cinwaankaaga ama faahfaahinta xiriirkaaga.



## Macluumaad iyo caawimaad

### Xafiiska Xeer-ilaalinta Guud

565 Lonsdale Street Melbourne 3000
T: (03) 9603 7666
E info@opp.vic.gov.au
W: opp.vic.gov.au

### Adeegga Caawinta Dhibanayaasha (VWAS)

565 Lonsdale Street Melbourne 3000
T: (03) 9603 7425
T: 1800 641 927 (toll free)
E: wasadmin@opp.vic.gov.au
W: opp.vic.gov.au/victims-witnesses

### Khadka Gargaarka Dhibanaha

T: 1800 819 817 (toll free)
Text: 0427 767 891
E: vsa@justice.vic.gov.au
W: victimsofcrime.vic.gov.au

### Khadka macluumaadka Vision Australia

T: 1300 847 466 (toll free)
TTY Services: 13 36 77 (hearing impaired)
W: visionaustralia.org

### Adeegga Fasiridda iyo Turjumaadda Taleefanka

T: 13 14 50 (toll free)

## Maxkamadaha

### Maxkamada Magistrate-ka Melbourne

233 William Street Melbourne 3000
T: (03) 9628 7777
W: mcv.vic.gov.au

### Maxkamadda Degmada Victoria

250 William Street Melbourne 3000
T: (03) 8636 6888
W: countycourt.vic.gov.au

### Maxkamadda Sare ee Victoria

210 William Street Melbourne 3000
T: (03) 8600 2000
W: supremecourt.vic.gov.au

U yeedhidda maxkamaddaadu waxay yeelan doontaa cinwaanka maxkamadda ee aad u baahan tahay inaad timaadid.

Office of Public Prosecutions Victoria

Waxaa daabacay oo xuquuqda leh
Xafiiska Xeer-ilaalinta Guud (Victoria) Juun 2014